



HESHIISKA MAAMUL U SAMEYNTA GOBOLLADA DHEXE
(MUDUG IYO GALGADUUD)

1. Hordhac:

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya (XFS) waxay horraantii bishan Luuliyo Muqdisho ku martiqadday wafdiyo ka kala socday Dawlad Goboleedka Galmudug, Maamulka Ximan & Xeeb, Maamulka Alsunna Wal Jamaaca. Ujeeddada martiqaadka XFS u fidiisay waxay ahayd in fursad loo sameeyo dadka degan gobollada Galgaduud iyo Mudug sidi ay si wadajir ah ugu sameysan lahaayeen maamul goboleed loo dhan yahay.

Xukuumaddu waxay u xilsaartay hoggaaminta dhismaha maamulkan guddi ka tirsan Golaha Wasiirada XFS, oo kala ah:

1. Cabdullaahi Goodax Barre,

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.

2. Mustafa Sheekh Cali Dhuxulow,

Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta.

3. Ducaale Adam Maxamed,

Wasiirka Wasaaradda Hiddaha & Tacliinta Sare.

4. Mahad Maxamed Salaad,

Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda & Dhiirigelinta Maalgashiga.

5. Axmed Cali Salaad,

Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta.

Kulamada ay Xukuumadda Federaalka la yeelatay dhinacyadan kor ku xusan iyo beelaha deegaanka, waxay bilowdeen 2dii Luuliyo 2014. Waxayna si gaar gaar ah oo is xig-xigta kulamo la tashi ula yeelatay dhinacyada kor ku xusan, kuwasoo ugu dambayn ku heshiiyay mabaadii'da asaasiga ah ee lagu dhisaayo maamulka Gobollada Galgaduud iyo Mudug.

2. Hadaba Dhinacyada kor ku xusan:

- **Iyadoo la garwaaqsaday**, baahida loo qabo qoorshe siyaasadeed oo cad oo lagu gaarayo dhismaha nidaam Maamul oo rasmi ah oo ku saleysan rabitaanka dadka, waafaqsanna Dastuurka Ku-Meel Gaarka ah ee J.F. Soomaaliya, taasoo ay muuqato in dadku u hiyi qabaan.

[Handwritten signatures]

[Signature]

- **Iyadoo la ayidaayo**, muhiimadda ay leedahay in la dhiiri galiyo heshiis loo dhanyahay, oo horseedaya sharci iyo kala-dambeyn, bixinta adeegyada asaasiga ah iyo xoojinta maamulka heer degmo, gobol, iyo kan federaalka intaba.
- **Iyadoo si buuxda loo ixtiraamayo**, midnimada, madax-bannaanida iyo israacsanaanta dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- **Iyadoo ay lagama maarmaan tahay** doorka hogaamintaa XFS ee isku dubaridka hannaanka iyo geeddi socodka maamul u sameynta Gobolladda Mudug iyo Galgaduud .

3. Waxay isku af garteen:

1. In la dhiso maamul ay yeeshaan Gobollada Mudug iyo Galgaduud.
2. In dhismaha maamulka ay ka qeyb qaataan dhammaan beelaha Soomaaliyed ee wada dega Gobollada Mudug iyo Galgaduud.
3. In la dhiso guddi farsamo oo ka kooban 25 xubnood oo ka socda dhammaan beelaha dega gobolladaas. Guddigaas farsamo waxaa lagu soo magacaabayaa toban maalmood gudahooda marka la saxiixo heshiiskaan.
4. Maamulka la dhisayo isagoo matalaya dhammaan beelaha dega labadaas gobol wuxuu u hawlgeleyaa si wadajir ah in loola dagaalamo nabab-diidka goboladaasna lagu soo dabaalo nabab iyo xasilooni.
5. Geeddi socodka dhismaaha maamulka waxaa lagu dhameystirayaa muddo ku siman 60 maalmood, waxaana fududeynaayana XFS.
6. In la qabto shirweyne ay u dhan yihiin dhammaan beelaha degan gobolada Mudug iyo Galgaduud si loo dhiso maamul goboleed ka kooban labadaas gobol.
7. XFS ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta, meel marinta iyo taabbogelinta heshiiskan, siinayana wixii tasiilaad ah.
8. Shaqada iyo waajibaadka guddiga farsamada waxaa soo diyaarinaya XFS, kuna soo celinaya saxiixayaasha.
9. Cid alla ciddii carqaladeysa hannaanka geeddi socodkaan waxaa loo aqoonsanayaa qas Wade iyadoo laga qaadaayo tallaabada ku habboon.
10. Heshiiskaan wuxuu dhaqan galayaa laga billaabo maalinta la saxiixo.
11. Heshiiskan waxaa si wada jir ah u saxiixaya Dawlad Goboleedka Galmudug, Maamulka Alsunna Wal Jamaaca, Maamulka Ximan & Xeeb, iyo 4 xubnood oo Golaha Wasiirrada ee ka soo jeeda Gobolladaas.

Amara Ahmed

AM

MJ ASD

X

Abdullah

Sexiixayaashu waxay dhammaantood sexiixooda ku caddaynayaan waafaqsanaantooda dhismaha maamul goboleed ay yeshaan gobollada Galgaduud iyo Mudug oo loo dhanyahay.

4. Magacyada Sexiixayaasha waa kuwan:

Cabdi Xasan Cawaale Qaybdiid

D/Goboledka Galmudug



Shekh Ibraahim Shekh Xasan Guureeye

Maamulka Alsunna Wal Jamaaca


Cabdullaahi Maxamed Cali (Baarleex)

Maamulka Ximan & Xeeb


Mustafa Sheekh Cali Dhuxulow

XFS



Ducaale Adam Maxamed

XFS


Axmed Cali Salaad (Taako)

XFS


Mahad Maxamed Salaad


XFS



Dammaanad-qaade: Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Cabdullaahi Goodax Barre



Goobjoog

Safir Michele Cervone
Ergeyga Gaarka ah ee Midowga Yurub

Midowga Yurub




Safiir Muhammed Affey
Ergeyga Gaarka ah ee Urur
Goboleedka IGAD

IGAD
Mohamed A. Affey.

Safiir Nicholas Kay
Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud
ee Qaramada Midoobay

Xafiiska Qaramada
Midoobey ee Soomaaliya

.....

Marwo Lydia Wanyoto Mutende
Sii hayaha Wakiilka Gaarka ah ee
Guddoomiyaha Komishanka Midowga Afrika

Midowga Afrika

En. Shale

.....

30th July, 2014

A. G. B. S.

✓ 8th August 2014 MS 1/11 ✓